# Waxa loola jeedo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh"

Dawladdu waxay hadda soo gudbinaysaa tafaasiil dheeraad ah oo lagu sheegayo waxa loola jeedo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh". Marka loo gudbo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" dadku nololmaalmeedka in aad u yar ayay dareemi doonaan cudurka safmarka ah. Gadaal ayay dawladdu ka soo sheegi doontaa goorta loo gudbi karo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh".

– Marka lagu laabto maalin caadi ah, xeerarka heer qaran ah intooda badan waa la joojinayaa. Shuruuddii halka mitir waa la joojinayaa. Xayiraadihii qabanqaabooyinka iyo isu imaatinnada ayagana sidoo kale. Joojintii gelidda cawaysyada iyo shuruuddii goobaha cuntada/cabbidda ee ku saabsanaa qaabka miisaska loo dhigayo ayaa ayaguna meesha ka baxaya. Laakiin weli waa in aan xusuusannaa in gacmaha la nadiifiyo iyo in aan guriga joogno haddii aan xanuunsanno, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Marka la galo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" qofka uu ku dhaco covid-19 waxaa weli looga baahan doonaa in uu gooni u baxo.

Marka la galo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" nidaamka midabbada nalalka samaanfalaha waddooyinka ayaa lagu salayn doonaa ka hortagga cudurka ee iskoollada iyo xannaanooyinka carruuraha, kaas oo ugu yaraan la isticmaali doono muddo kala-guur ah.

Talooyin cudurka looga hortagayo iyo soojeedinno labaduba weli waa jiri doonaan, laakiin waxay ahaan doonaan kuwo u eg soojeedinnada guud ee infakshannada marinnada hawada. Dawladdu ayada oo kaashanaysa Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayay ka sii shaqayn

doontaa caddaynta iyo faahfaahinta talooyinka jiri doono marka la galo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh".

## Waxyaalo la fududayn doono marka waddanka la soo gelayo

Marka loo gudbo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" waxay dawladdu joojin doontaa xeerarkii ajnebiga ka hor istaagayay in ay Norway soo galaan – marka laga reebo dadka ka imaanaya waddan saddexaad oo aan ahayn kuwa loogu yeero waddammada midabka basaliga ah ee cudurku ku yar yahay. Waa waddammo iyo meelo ku jira liiska waddammada saddexaad ee Midowga Yurub (EU) kuwaas oo xaaladda faafidda cudurka awgeed loogu yara debciyay xeerarka soo gelidda waddanka.

– Taas macnaheedu ma aha in aan qaadi doonno dhammaan xeerarka waxyaalaha laga rabo dadka safarka ah marka ay waddanka yimaadaan sida tijaaba-qaadka iyo karantiilka. Laakiin xeerarkaan laftigooda xoogaa ayaa la fududayn doonaa. Debcinta xeerarkan lagu sameeyo waxay ahaan doontaa mid si fiican loola socdo si ay noogu suuragasho in aan ogaanno haddii cudur dibedda nooga yimaado ayuu yiri Høie.
Gadaal ayay dawladdu ka soo sheegi doontaa xeerarka tijaaba-qaadka iyo kuwa karantiilka ee lagu xiri doono soo gelidda waddanka marka la galo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh".

## Koontaroolki waxaa looga gudbayaa heegan

Marka la galo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh" waxay dawladdu ka gudbaysaa istaraatiijayaddii koontaroolka, waxayna u gudbaysaa istaraatiijayad heegan ah.

– Hay’adaha heer deegaan iyo kuwa heer qaran ayaa si hoose ula socon doona is-beddelka, si degdeg tillaabooyin loo soo rogi karo haddii xaaladdu is beddesho. Dawladda, hay’adaha caafimaadka, isbataallada iyo degmooyinka ayaa samayn doona la-socosho iyo heegan ka sarreeya kuwa marka xaaladdu caadi tahay. Degmooyinka ayaa ayaguna deegaankooda ku soo rogi kara xeer-hoosaad lagu soo celinayo tillaabooyin heer qaran ahaan la joojiyay, ayuu yiri Høie.

Tilmaamaha soo socda ayay hay'aduhu ku salayn doonaan halista ay wax ka qabanayaan:

- Tirada dadka cusub ee isbataallada la dhigo iyo tirada bukaanka isku hal mar isbataallada yaalla (tirada guud ee dadka isbataallada yaalla).
- Da'da dadka isbataallada yaalla.
- Tirada dadka yaalla qaybaha gargaarka degdegga ah ee isbataallada.
- Awoodda daaweynta ee degmooyinka.

Waxaa kale oo qiimaynta lagu darayaa is-beddelka guud ee safmarka.

## Heeganka waa la sii wadayaa

In kasta oo in aad u badan oo dadka ah la tallaalay, haddana weli aqoon nagu filan lagama hayo muddada qofku difaacnaanayo. Sidoo kale, waxaa dhici karta in ay soo baxaan noocyo cusub oo fayras ah oo aan tallaalladu si fiican wax uga tarayn- taas oo keeni karta in ay mar kale lagama maarmaan noqoto in la soo rogo tillaabooyin heer qaran iyo kuwo heer deegaan. Sidaas darteed ayaa degmooyinka looga baahan yahay in ay sanadka inta ka hartay sii wadaan heerka heeganka ee maanta jira (heeganka hay'adda- iyo hoggaanka). Waxaa sidoo kale looga baahan yahay heegan aasaasi ah oo tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid iyo raadraacidda cudurka iyo karantiilka (TISK), taas oo toddobaadkiiba dadweynaha boqolkiiba 10 loo qaybin karo tijaabooyin natiijada degdeg loo helayo. Degmooyinka iyo hay'adaha caafimaadka labaduba waa in ay toddobaad kasta tijaabo ka qaadi karaan dadweynaha boqolkiiba 1. Waana in ay lahaadaan heegan ay shan maalin gudahood ku kordhin karaan tirada dadka ay tijaabada ka qaadi karaan oo gaarsiin karaan dadweynaha boqolkiiba 5, ayaga oo isla markaana si sidaas la mid ah u kordhinaya hawlaha TISK.

Tafaasiil intaas ka badan waxaad ka helaysaa war-saxaafadeedka soo rogidda "TISK la debciyay".

Waxaa kale oo degmooyinka laga rabaa in ay u diyaargaroobaan in ay dadweynaha degmada cirbad saddexaad ku tallaali karaan haddii loo baahdo. Taas oo ka dhigan in degmooyinka waddanka looga baahan yahay in ay halkii toddobaad dadka ku tallaali karaan 200 000 oo cirbadood, islamarkaana awood

u leeyihiin in ay cirbadaha intaas aad uga badiyaan afar toddobaad gudahood. Bisha nofeembar ayay mar kale dawladdu qiimayn doontaa heerka heeganka ee loo baahan yahay xilliga qaboobaha.

– Wadahadal ku saabsan waxa loola jeedo "Maalin caadi ah oo heegan sare leh", ayaa degmooyinka noo socda, si ay si wanaagsan ugu diyaargaroobaan. Sidii hore oo kale ayaa degmooyinka looga bixin doonaa kharashka covid-19, ayuu yiri Høie.